

Wargeyska Mountain View

Diseembar 21, 2016

Qamiis, Diseembar 22.....Shirka Heesaha Arddayga, Gym @2:00

Jimco, Diseembar 23.....Riwaayadda Ardayda u Dhigto Waalidiinta, Gym @8:30

Jimco, Diseembar 23.....Sii Deynta Ardayda 12:40

Isniin, Diseembar 26 - Janaayo 8.....Ma Jiro Dugsi

Isniin, Janaayo 9.....Resumeeyada Dugsiga

Fariinta Agaasimaha

Dugsiga Mountain View, waxaan ka walwalsanahay ammaanka dhamaan ardayda iyo shaqaalaha. Mid ka mid ah waxyaabaha aan ka walwalno waxaa ka mid ah ammaanka meesha la dhigto baabuurka. Isniintii la soo dhaafay, waxaa dhacday in waalid uu cunigiisa xanaanada ku dajiyay meesha baabuurta la dhigto kaddibna u sheegay cunugga in uu tago fasalka. Cunugi wuxuu gadaal ka maray baabuur, wuxuuna ku sigtay in uu ku dhaco baabuur gadaal u soo socda. Waxaan idinka codsaneynaa in haddii aad dajineysaan caruur, fadlan marka hore dhigta baabuurta, kaddibna waxaad caruurta si nabad ah u gaarsiisaan meelaha loogu talagalay in lagu socdo, ama ugu yaraan, waxaad baabuurka ku dhaweystaan meelaha loogu talagalay in lagu socdo, idinka oo cunugga ku dajiya dhinaca lagu socdo baddalkii aad ku dajin lahaydeen dhinaca baabuurta ku socoto. Dadka daggan xaafadda, talada ugu fiican waxay tahay in la yareeyo saxmada iyo baabuurta ku sugan meelaha la dhigto si ardayda socod ku tagaan dugsiga iyaga oo u socda koox-koox. Waa la soo dhaweynaa waalid kasta oo diyaar u ah in uu kooxaha ardayda socod ku gaarsiiyo dugsiga. Haddii aad diyaar u tahay in aad bixisid adeegga noocaas, fadlan la xariir xafiiska.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Janaayo 10, marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Muusikada Mountain View Virtuosos

Todobaadkii la soo dhaafay, ardayda ka qeybqaadata muusikada iyo fasalada "fioliinka" saacadaha dambe dugsiga, waxay barnaamij u dhigeen waalidiinta, asxaabta, iyo martida. Waxay qabteen shaqo wanaagsan, taasoo muujisay xirfadahooda, akhriska muusikada, heesta, iyo garaaca "fiyoliinka." Waxaan u mahad celineynaa Gifted Music School (Dugsiga Hibbada Muusikada) bacdamaa ay macalimiin heer sare ah siyeen ardaydena xanaanada iyo kuwa doortay in ay ka qeybqaataan xanaanada kaddib. Waxaan kaloo u mahad celineynaa Gifted Music School iyo kuwa deeqda bixiya badamaa ay qalab siiyeen ardaydena awoodda u yeeshay in ay garaacaan.

Jidka Virtuosos!

Ardayda u Garaaci Doonto Waalidiinta iyo Martida Maalinta Jimcaha

Maalinta Jimcaha, Diseembar 23, ardaydena waxay hees u qaadi doonaan waalidiinta iyo martida kale, laga bilaabo 8:30, qolka shirarka. Darajo kasta waxay soo geli doontaa markeeda si lagu siiyo xoogga farxad xilliga fasaxa.